



Luulyo 29, 2020

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Toddobaadkan, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ayaa soo saaray [farriinta](#) ku dhawaaqista hakinta ansixinta Kordhinta Taageerada Qoyska iyo oggolaanshaha Taageerada Qoyska ee dheeraadka ah oo si dhakhsi ah u dhaqan galaysa.

ODDS ayaa si dhakhso ah u dhaqaaqday si ay u aqoonsato siyaabo waqtiyada/maalmaha hore ee uu jiro cudurka baahsan ee COVID-19 loogu taageero qoysaska. Marar dhif ah ayaan dhaqaale ku bixinaa barnaamijka Taageerada Qoyska intii muddo laba sano ahaydba markaa waxaa go'aansanay in aan ballaarino helitaanka dhaqaalaha Taageerada Qoyska, iyada oo la kordhinayo tirada qoysaska heli kara dhaqaale iyo oggolaanshaha gadashada waxyaabaha aanan sida caadiga ah la oggolayn marka la isticmaalayo Medicaid. ODDS waxay rabtay in ay gacan ka geysato taageerada qoysaska inta lagu jiro cudurka baahsan, gaar ahaan maadaama dugsiyadu xirnaayeen oo qoysas badana xaalad adag ku jireen intii lagu jiray amarka guri joogista.

Waanu ka mahad celinaynaa shaqada adag ee ay qabatay CDDP si ay dib ugu eegto codsiyada una oggolaato waxyaabaha kala duwan si qoysaska loo caawiya inta lagu jiro waqtiga adag. Waxaan sidoo kale maqalnay qoysas badan oo ka mahad celinaya taageerada dheeraadka ah intii lagu jiray amarka guri joogista iyo awooda lagu gadanayo waxyaabo kala duwan si carruurta looga caawiyo in ay noqdaan kuwo firfircoon oo caafimaad qaba.

Intii aan ka kordhinaynay helitaanka adeega, ODDS ma aysan heli dhaqaale dheeraad ah oo loogu talagalay dadaalkan gaarka ah. Tani awgeed, ODDS waxay hakinaysaa oggolaanshaha Taageerada Qoyska iyo Kordhinta Taageerada Qoyska labadoodaba inta aanu ka qiimeynayno xaalada miisaaniyadda.

Waxaan rabaa in aan qiroy dhibaatada dad badan ka soo wajahday dugsiga internet-ka laga dhiganayo iyo joogtaynta qoyska iyo nolosha shaqo iyada bartanka lagaga jiro cudurka baahsan iyo ammarada guri joogista. Waxaan rajayneynaa in kordhinta taageeradu ay gacan ka geysatay intii lagu jiray bilihii hore ee adkaa ee cudurka baahsan.

Waad ku mahadsan tihii wax kasta oo aad sameyso si waqtigan la joogo loo taageero dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaamisha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.